



Xafiiska Qaramadda Midoobay U Qaabilsan Arrimaha Soomaaliya (UNPOS)

War-Saxaafadeed –0037/2008

Guddiga Caalamiga ah ee la Xiriiirka Arrimaha Soomaaliya oo ku shiri doona Xarunta Qaramadda Midoobay

Nayrobi, 14 Disembar 2008- Kooxda Caalamiga ah ee La-Xariirka Arrimaha Soomaaliya, waxay qaban doonaan shir muhiim ah maalinta Talaadada ah ee 16ka Disembar, wuxuuna shirka ka dhacayaa Xarunta Qaramadda Midoobay ee New York. Waxaa la filaya in Xoghayaha Arrimaha Dibedda ee Dawladda Mareykanka (USA), Haweenadada la yiraahdo Condoleeza Rice oo ay weheliyaan Wasiiro kale ay ka mid noqon doonaan ka qeyb galayasha wadahalada. Waxaa hubaal ah in la canbaareen doono khilaafka ka soo dhex cusboonaaday Madaxweynaha iyo Ra'iisul Wasaaraha, uuna yahay mid looga jeedinayo dadka Soomaaliyeed arrinta dhabta ah ee ay doonayaan in wax laga qabto.

Kooxda la Xariirka: waa saaxiibo Soomaaliyeed oo kulmaaya, waxayna ka kooban yihiin, waddamo iyo ururro gaar ah, sida Midowga Afrika iyo Jaamacadda Carabta. Waxaana Shir-guddoominaya Ergayga Gaarka ah ee Qaramadda Midoobay U Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya; Ahmedou Ould Abdallah. Guddigana wuxuu shiraa sanadkiiba laba jeer.

Shir maalmeedkan ka dhacdoona Xarunta Qaramadda Midoobay waxaa looga hadlidoonaa dhowr arrimood oo la xiriira arrimaha Siyaasadda, Nabadgelyada iyo Bin'aadinimo ee ka jira Soomaaliya. Sidoo kale, waxaa shirka lagaga hadlidoona iskaashiga siyaaso, xuquuqul-insaan, burcad-badeenimo, dib u dhiska iyo horumarintaba. Shirkan wuxuu dhacayaa wax yar ka hor inta-uusan qabsoomin Shirka Golaha Amaanka oo la filaayo in ajendadiisa ay ka mid noqoto burcad badeednimada ka jirta Soomaaliya.

“Waxaan rajeynaynaa in ergo aad u badan ay ka soo qayb galaan Shirka La-Xiriirka Arrimaha Soomaaliya, kuwaa soo heerkoodu sareeyo, ayuu Ould Abdallah”. “Arrintani waxay ku tusaysa in danayta arrimaha Soomaaliya ay issasoo tarayso Heer Gobol iyo Heer Caalamiba”ah. Waxaa kale oo muuqda rabitaan issasoo taraayo oo loogu dan leeyahay in Soomaalida horey ugu socoto waddada nabadda, waxna ka qabato dhaqanka ku saabsan “dembi gal haddana iska soco” “IMPUNITY”. Falkan UMPUNITY wuxuu ka mid yahay sabaha ugu weyn ee sii-socoshada nabadgelyo la'aanta ka jirta Soomaaliya.

“Hase-ahaatee, dadaalka Bulshada Caalamka wuxuu ahaanayaa mid xaddidan, ilaa ay dadka Soomaaliyeed la yimaadaan dadaal xoog leh oo ay ku mideyneyaan ugana hawl galaan dhameynta dhibaataada”. Waxaan fahamsanahay in sii socoshada muranka joogtada ah ee ka dhexeeya madaxda TFG, “si da ku cad hadal qoraalka maanta ka soo

baxay Baidoa” ay dad badan oo Soomaaliyeed, Urur Goboledka IGAD, Bulshada Caalamka oo xaafiiskeygu ka mid yahay ay diidi-doonaan”.

“Hoganka Soomaaliyeed ee TFG-da, ARSta iyo kooxaxa kaleba waa in ay ogaadaan inaan Wadadda nabada laga soo noqon karin. Sidoo kale, waa in la ogaadaa in ay soo yaraadeen maalmihii iska horimaad aan loo baahneen la sameyn jiray, taasoo dhibaato uun hor-seedaysay”.

“Dadka Soomaaliyeed waa in ay ka faa’iideystaan fursada u keenay geedi-socodka nabada, waana in aysan dadkooda khasaarin. Maslaxadda ummadda darteeda, watiga hadda aan ku jirno, dagaalka ummadda dhexdeeda ah waa in uu istaaga”.

Shirka Guddiga la Xiriirka Arrimaha Soomaaliya, wuxuu ifinaya arrinta Soomaaliya, wuxuuna ku dadaali doonaa sidii ay ugu soo bixi lahaayeen arrimo waxtar leh iyo talaabooyin la taaban karo oo ku aadan sidii bulshada caalamku horey ugu martin laheyd geedi socodaka nabada”.

“Xubnaha Guddiga la Xiriirka Arrimaha Soomaaliya waxay ka kooban yihiin: Burundi, Canada, Djibouti, Egypt, Ethiopia, France, Germany, Italy, Kenya, Norway, Saudi Arabia, Sweden, South Africa, Tanzania, Uganda, United Kingdom, Yemen, Afiracn Union, European Union, European Commission, League of Arab States, IGAD, Organization of Islamic Conference”.

For more information please contact: Susannah Price, Public Information Officer, UN Political Office for Somalia (Nairobi, Kenya) Tel. +254 20 762 1192 (o) or +254 733 902020 (m). Please visit: www.UN-Somalia.org